

Dowladda Soomaaliyeed ee Puntland
Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta
Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ah
Waaxda Tirokoobka Puntland



MoPEDIC



**TUSAHA SICIRKA ADEEGGA DAMBIISHA
LUULIYO 2020**

Warbixinta Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha ee Bisha Juulay


Dhaqdhaqaqa Billaha ee Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha

Tusaha Guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha (TSD) qeybahiisa kala-duwan ayaa intii lagu guda jiray bishii Luuliyo 2020 ayaa kaso kacay 88.32 gaarayns 89.64. Isbedelka bishii Luuliyo ayaa ah koror dhan 1.51 boqolkiiba, halka bishii ka horeysay ee Juun 2020 ka ahaa koror dhan 0.24 boqolkiiba.

Qeybaha badeecadaha ee sicirkoodu bishaan sida xoogan u siyaaday marka loo eego qeybaha kale ayaa kala ah: Qeypta Cuntada iyo cabitaanadda (3.14 %), Caafimaadka (3.05%), Dharka iyo Kabaha (0.99%), Badeecadaha iyo agabka isku jirka ah (0.75%), iyo Gaadiidka (0.63%),

Dhinaca kale, hoos u dhac ayaa ku yimid sicirka qeybaha Tubaakada iyo Jaadka (-1.09%), Agabka guryaha (-0.35%) iyo Kirada Guryaha, Korantada, Biya iyo shidaalka (-0.13%) Hoos u dhacaan ayaa qeyb ahaan dheelitiray isbedelka togan ee ku dhacay sicirka badeecadaha kor ku xusan, taas oo horseeday isu dhowaanshaha heerka Tusaha guud ee sicirka Dambiisha iyo Jiitimaad ku sugnaansha Jaantuuska muujinaya dhaqdhaqaqa Tusaha guud ee sicirka Dambiisha


Jaantuuska 1aad: Jaantuusyada Heerka Sicir Baraka Iyo Dhaqdhaqaqa Tusaha Guud Ee Sicirka Dambiisha Juun 2020



Jadwalka 1aad: Heerka Sicir bararka billaha ah ee -Luuliyo 2020 (2015=100)

Tusaha Sicirka Dambiisha, Juulay	
Tusaha (bishan) = Luuliyo 2020	89.64
Tusaha (bishii hore) = Juun 2020	88.32
Tusaha (sanadkii hores isla bishan) = Luuliyo 2019	84.18
Isbedelka % bilaha ah = Juun 2020/ Luuliyo 2020	1.51
Isbedelka % sanadlaha ah (heerka sicir bararka) = Juun 2019/Juun 2020	6.50

Jaantuuska 2aad: TSD, Isbedellada Ugu Waaweyn Ee Bilaha Ah Iyada Oo Loo Eegayo Hanaanka Caalamiga Ah Ee Kala Saarida Qaybaha Badeecadaha.



Qaybaha Isbedelka uga badan ee dhanka Togan Ku Yimid Bisha Juun 2020

- Cuntada Iyo Cabitaanadda** sicirkooda ayaa kordhay 3.14% bishii Luuliyo 2020 marka loo-barbar dhigo korarkii bishii juun oo ahaa (0.17%). Qiimo kaca uga badan ee bishan wuxuu ka yimid sicirka Cuntada oo siyaaday (3.29%).
- Sicirka Dawooyinka, Adeegga Iyo Agabka Caafimaadka** ayaa kor u kacay (3.05%) bishii Luuliyo 2020 marka la barbar dhigo bishii Juun oo uu ahaa kacay (0.71%) kororkan bishaan waxaa loo tirinaya qiimaha daweynta bukaanka (3.72%) iyo Agabka caafimaadka oo iyana kacay in u dhiganta (2.64%).
- Dharka Iyo Kabaha** sicirkooda ayaa kordhay (0.99%) bishii Luuliyo 2020 marka la barbar dhigo bishii Juun oo uu ahaa (-1.18%). kororkan bishaan waxaa loo tirinaya qiimaha Kabaha oo kacy (1.46%) iyo Dharka (0.90%).
- Badeecadaha Iuo Adeegyada Iskujirka Ah** ayaa kor u kacay (0.75%) bishii Luuliyo 2020 marka la barbar dhigo bishii Juun oo uu ahaa kacay (0.23%) kororkan bishaan waxaa loo tirinaya qiimaha agabka agabka ilaysku qurxiyo (4.47%).

- **Gaadiidka** ayaa kor u kacay (0.63%) bishii Luuliyo 2020 marka loo barbardhigo bishii Juun 2020 oo uu ahaa (1.25%). waxaa sababay kor u kaca bishan sicirka hawlgalinta gaadiidka khaaska aha (2.44%), gadashada gawaaridda oo kordhay (0.85%).

Qaybaha Isbedelka Taban ee Xooga-leh Ku Yimid Bisha Luuliyo 2020

- **Tubaakada Iyo Jaadka** ayaa hoos u dhacay (-1.09 %) bishii Luuliyo 2020 halka bishii horeysay ee Juun 2020 uu ahaa (1.54%). Hoos u dhaca uga badan ee bishan wuxuu ka yimid sicirka Jaadka oo hoos u dhacay (-3.12%).
- **Agabka Guryaha Iyo Dayactirka** ayaa sicirkoodu hoos u dhacay (-0.21%) bishii Luuliyo 2020 marka la barbar dhigo bishii hore ee Juun oo uu kordhay (0.05 %) hoos u dhacan ayaa loo sababaynaya inuu keenay sicirka agbabka iyo adeegyada dayactirka (-1.85%).
- **Qaybta Kirada Guryaha, Adeegyada Biyaha, Korontada, Gaaska Iyo Shidaalada Kale** ayaa sicirkoodu hoos u dhacay (-0.13 %) bishii Luuliyo 2020 halka bishii horeysay ee Juun 2020 uu ahaa (0.66%). Hoos u dhaca uga badan ee bishan wuxuu ka yimid sicirka Dayactirka guryaha (-3.12%).

Tusaha Sicirka Dambiisha: Qaybo Si Gaar Ah Loo Eegay ee Bisha Luuliyo 2020

Cuntada Iyo Cabitaanada, Kirada Guryaha, Adeegyada, Biyaha, Korontada, Gaaska Iyo Shidaaladda Kale ayaa celcelis ahaan hadda ah qaybaha ugu muhiimsan dambiisha Addeggaa, maadama ay saamiga ugu badan ka yihii kharashaadka qoysaska, tan ayaa ka dhigaysa qeybahan inay saameynta ugu badan ku yeeshaan isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha.


Sicirka Cuntada Iyo Cabitaanada ayaa intii lagu jiray bishii Luuliyo 2020 waxaa ku yimid kor u kac dhan (3.14%) marka loo barbar dhigo isbedelkii Juun 2020 (0.17%). Sicir bararka sanadlaha ah ee qaybta cuntada iyo cabitaanada sanad dhamaadka bisha Luuliyo 2020 ayaa gaarayey (7.13%) marka loo eego sicir bararka Juun 2020 kabil kabil oo ahaa (4.16%).

Jadwalka 2aad: Isbedelka Billaha ee qeybaha ugu muhiimsan Cuntada

Magaca shayga	Maajo	Juun	Luuliyo
Cuntada iyo Cabitaanada	0.6	0.17	3.14
Cuntada	0.61	0.22	3.29
Rootiga, Bariisaka, Burka iyo badarka	0.7	-1.31	-0.08
Sonkorta	-1.02	-2.85	-0.86
Hilibka noocyada xoolaha	-0.89	0.2	5.61
Kalluunka	-0.01	0	0
Caanaha liiska ah iyo kalluunka	2.2	1.43	-0.61
Saliida iyo ashyaada dufanka leh	-0.45	1.42	-0.04
Miro Beeraadka sida Cambaha & Muuska	1.53	0.73	1.98
Khudaarta Cagaaran	0.98	0.2	18.40

Sicirka Qaybta Kirada Guryaha, Adeegyada Biyaha, Korontada, Gaaska Iyo Shidaalada Kale ayaa bishii Luuliyo celcelis ahaan hoos u dhacay (-0.13%) halka uu bishii Juun kor u kacay (0.66%) sicir bararka kabil kabil ee Luuliyo ayaa siyaaday (2.94%)marka loo barbar dhigo sicir barar ka sanad dhammaadkii Juun 2020 uu ahaa (3.03%).

Jaantuuska 3aad: TSD Guud Iyo Qeybo Si Gaar Ah Loo Eegay




Source: Puntland Statistics Department

Dhaqdhaqaaqa Sanadlahaa ee Tusaha Sicirka Dambiisha ee Sanad Dhamaadka Juun 2020

Isbedelka sanadlahaa ah ee heerka sicir bararka ee 12kii billood ee u dhxeeyey billihii Luuliyo 2019 iyo Luuliyo 2020 ayaa ahaa 6.50 boqolkiiba, halka sanad dhammaadkii Juun 2020 uu kordhay 4.80 boqolkiiba. Qaybaha badeecadaha ee sicirkoodu sida xoogan u siyaday 12-kii billood ee u dhxeeyay Luuliyo 2019 iyo Luuliyo 2020 ayaa kala ah: Tubaako iyo Jaad (+19.09%), Dharka iyo Kabaha (+13.86%), Makhaayadaha iyo uteelada (9.90%), Badeecadaha iyo Adeegyada iskujirka ah (8.75%). Caafimaadka (8.60%), Waxbarashada (7.92%),

TSD: Jaantuuska 4aad; Sicir-bararka sanadlaho ah ee qeybaha badeecadaha iyada oo loo eegayo hanaanka caalamiga ah ee kala soocida badeecadaha; Juun 2020.



Qaybaha sicir bararka Xoogan ee sanadlaho ah uu ku dhacay sanad dhamaadka Luuliyo 2020

- **Sicirka Tubaakada Iyo Jaadka** ayaa sanad dhamaadkii bisha Luuliyo 2020 kor u kacay 19.09% halka uu sanad dhamaadakii Juun 2020 uu kordhay 14.70%, Kor u kacan ayaa ka yimid: Jaadka (+21.04%). iyo Tubaakada (+18.30%).
- **Sicirka Qeybaha Dharka Iyo Kabaha** ayaa sanad dhmmaadkii Luuliyo 2020 Kor u kacay 13.86%, halka sanad dhamaadakii Juun 2020 uu kordhay 10.41%, kor u kacan waxaa sababay sicirka Dharka (+19.92%),
- **Makhaayadaha Iyo Huteelada** ayaa sanad dhmmaadkii Luuliyo 2020 Kor u kacay 9.90%, halka sanad dhamaadakii Juun 2020 uu kordhay 6.46%, kor u kacan waxaa sababay sicirka Makhaayadaha (+11.23%),
- **Badeecadaha Iyo Adeegyada Iskujirka Ah** ayaa sanad dhamaadkii Luuliyo 2020 Kor u kacay 8.75% marka la bardadhigo sanad dhamaadkii ka horeeyey ee Juun 2020 oo uu kor u kacay 6.18%. Badeecadaha loo aanaynayo kor u kacaan ayaa ah agabka ilaysku qurxiyo (13.75%), iyo agabka Daryeelka Shakhsiga ah (7.51)..

- **Caafimaadka** ayaa sanad dhamaadkii Luuliyo 2020 kor u kacay 5.83% marka la barbardhigo sanad dhamaadkii ka horeeyey ee Juun 2020 oo uu kor u kacay 6.42% Sicir kororkan waxaa sababay Adeegyada Cusbitaalada oo siyaaday (+33.36%), iyo sicirka agabka caafimaadka (4.74%)
- **Waxbaashada** ayaa sanad dhamaadkii bishii Luuliyo 2020 Kor u kacay 7.92% halka sanad dhamaadakii Juun 2020 uu kordhay 10.32%, sare u kacaan waxaa sababey qiimaha waxbarsha Dugsiyada Sare (17.33%) , waxbarshada sare (11.87%) , biillhi u dambeeyey lagu kordhiyey khidmadaha imtixaanaadka iyo Waxbarashada Aasaasiga ah (7.92%),


Dhamaan isbedelka sicirka qaybaha TSD ayaa sanad dhamaadkii Luuliyo 2020 ahaa mid togan.

Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha: Sookoobidda dhaq-dhaqaaqaha iyo Dhibco ku biirinta Miisaaman

Jadwalka 3: Tirooyinka ugu muhiimsan dhaq-dhaqaaqyada Luuliyo 2020 (Index = 100 at 2015)

COICOP Classification Group	Jul-19	Jun-20	Jul-20	Jun-20 to Jul-20 (monthly)	Jul-19 to Jul-20 (annual)
	Index	Index	Index	% change	% change
TSD ee dhaman qaybaha badeecadaha	84.18	88.32	89.64	1.51	6.50
Cuntada iyo Cabitaanada	82.71	85.91	88.61	3.14	7.13
Tubaakada iyo Jaadka	83.75	100.84	99.74	-1.09	19.09
Dharka iyo Kabaha	83.19	93.79	94.72	0.99	13.86
Kirada guryaha, Biyaha, korontada, Gaaska iyo Shadaalda	84.69	87.30	87.18	-0.13	2.94
Agabka guryaha iyo Dayactirkooda	86.31	88.56	88.25	-0.35	2.24
Caafimaadka	81.35	85.74	88.35	3.05	8.60
Gaadiidka	88.44	92.57	93.15	0.63	5.33
Isgaarsiinta	85.85	87.62	87.73	0.12	2.19
Dhaqanka iyo Madadaalada	97.44	103.85	104.46	0.59	7.20
Waxbarashada	84.04	90.70	90.70	0.00	7.92
Maqaaxiyaha iyo Huteelada	77.01	84.50	84.64	0.17	9.90
Badeecadaha iyo Adeegyada isku jirka ah	110.48	119.25	120.14	0.75	8.75

Jaantuuska 5aad: Ku Biiriinta dhibcaha iyada oo la eegayo miisaanka Qeyb waliba leedahay



Source: Puntland Statistics Department

FG: Saameynt ay qayb kasta oo kamid ah qeybahaha uu kakooban yahay hanaanka kala soocida badeecadaha ay ku yeelanayso isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha waxay ku xiirantahay hadba saami culeyska ay qeyb walba ka tahay culeys dhismeedka Guud.